



Toronto
Community
Housing



Xirmada-aaladda Codsiga Lacagaha Waxqabadka Kiraystaha

Xirmadan waxaa ku jira dhamaan macluumaadka aad u baahan tahay si aad u dalbato Lacagaha Waxqabadka Kiraystaha.



Shaxda Tusmada

Ujeeddooyinka	3
Shuruudaha Xaq-u-lahanshaha	3
Habraaca codsiga	4
Waqtiga Kama-dambeysta ee soo-gudbinta	5
Kharashyada xaqa ah iyo kuwa aan xaqa ahayn	6
Foomka codsiga Lacagaha Waxqabadka Kiraystaha	8



**Wax-ka-qabashada
muhimadaha
kiraystaha si loo dhiso
beelo nolol leh**

Ujeedooyinka

Toronto Community Housing waxay sameyneysaa Miisas Lacag-bixin Ku-meelgaar ah si aay gacan uga geysato qeybinta Lacagaha Golaha Kiraystaha iyo Isticmaalka Meelaha (oo loo yaqaano Lacagaha Waxqabadka Kiraystaha). Lacagahan waxaa la siin doonaa kiraystayaasha ama kooxaha kiraystaha u baahan dhaqaale aay wax uga qabtaan muhimadaha beeshooda.

Shuruudaha xaq-ulahaanshaha

Dhamaan kiraystayaasha Toronto Community Housing waxay weydiisan karaan dhaqaale loogu talo-galay mashaariicda iyo dadaalada ka jawaabi doona muhimadaha kiraystayaasha tilmaameen.




Xubnaha Miisaska Lacag-bixinta Ku-meelgaarka ah looma ogola in aay soo gudbiyaan codsiyo loogu-talagalay dadaalada beelahooda, laakiin xubnaha beeshooda weey dalban karaan Lacagaha Waxqabadka Kiraystaha.

Codsadayaasha oo dhan waa in aay soo xiraan xisaabta hore loogu qoondeeyey inta aaysan raadsan dhaqaale dheeraad ah. Kirayste walba oo ku takrifala dhaqaale xaq uma yeelan doono mustaqbalka in uu dhaqaale dalbado.




Habraaca codsiga

Soo-gudbinta codsiga

Talaabada	Tilmaanta
	Talaabada koowaad: Soo degso foomka oo PDF ah ama ka dalbo Isku-duwahaaga Adeegyada Beesha degaanka ama email noogu soo dir taf@torontohousing.ca .
	Talaabada Labaad: Buuxi foomka codsiga. Haddii aad u baahan tahay kaalmo buuxinta foomka, la xiriir Isku-duwahaaga Adeegyada Beesha degaanka. Haddii aadan hubin qofka ah Isku-duwahaaga Adeegyada Beesha degaanka, waxaad ka wici kartaa xarunta Daryeelka Macaamiisha 416-981-5500 markaa wakiil ayaa kugu xiri doona qofka saxda ah.
	Talaabada Saddexaad: U dir foomka codsiga taf@torontohousing.ca .

Dib-u-eegid iyo ansixin

Talaabada	Tilmaanta
	Talaabada afraad: Miiska Lacag-bixinta Ku-meelgaarka ah ayaa dib u eegi doona foomka codsigaaga. Shaqaalaha ayaa kula soo xiriiri doona haddii aay jiraan wax su'aalo ah oo ku saabsan codsiga ama loo baahan yahay in wax lakala cadeeyo codsiga.



Habraaca codsiga



Talaabada shanaad: waxaad heli doontaa warqad codsigaaga halka uu marayo laguugu sheegayo laba toddobaad gudahood taariikhda kulanka dib-u-eegidda ka-dib. Haddii codsigaagala ansixiyo, Isku-duwahaaga howlgelinta Adeegyada Beesha ayaa kula soo xiriiri doona si uu kaagala hadlo talaabooyinka ku xiga.

Tilmaanta habraaca codsiga weey sii socotaa bogga 6.

Wax-ka-qabashada codsiyada iyo soo gudbinta warbixinta

Talaabada	Tilmaanta
	<p>Talaabada lixaad: Dhamaan go'aanada aay gaaraan Miiska Lacag-bixinta Ku-meelgaarka ah waa kama-dambeys. Haddii la soo codsado fikrad waa laga bixinayaa codsiyada la soo diiday. Codsiyada aan la ansixin dib waa loo soo gudbin karaa haddii aay la socdaan bedelaad ku haboon ama macluumaad dheeraad ah oo lagu taliyey.</p>
	<p>Talaabada toddobaad: Marka mashruuca uu dhamado, codsabayaasha oo dhan waxaa laga filaayaa in aay soo gudbiyaan foomka dhameystirka. Haddii jeeg la siiyey, codsabayaasha waa in aay ku soo daraan foomka warbixinta kharashyada, resiityada wax lagu iibsaday oo asal ah iyo wixii lacag ah ee aan la isticmaalin.</p> <p>Haddii aad u baahan tahay kaalmo buuxinta foomkaaga dhameystirka mashruuca ama xisaab-xirka lacagaha lagu qoondeeyey, waxaad la xiriiri kartaa Isku-duwahaaga howlgelinta Adeegyada Beesha.</p>

Waqtiga kama-dambeysta ee soo-gudbinta

Waa kuwan taariikhaha furaha ah ee goorta codsiyada aay dib-u-eegi doonaan guddiga dib-u-eegista ee Miiska Lacag-bixinta Ku-meelgaarka ah. Codsiyada waa in la helaa 11:59 habeenimo ama ka hor maalinta kama-dambeysta ah ee codsiga la gudbinayo.

- Dib-u-eegidda Sitembar, codsiyada waa in la soo gudbiyaa Sabti, Agoosto 31, 2019 ama ka hor.

- Dib-u-eegidda Oktoobar, codsiyada waa in la soo gudbiyaa Isniin, Sitembar 30, 2019 ama ka hor.
- Dib-u-eegidda Nufeembar, codsiyada waa in la soo gudbiyaa Khamiis, Oktoobar 31, 2019 ama ka hor.

Kharashyada xaqa ah iyo kuwa aan xaqa ahayn

Kiraystayaasha waxay heli doonaan fursad aay ku codsadaan kharashyo gaaraya ilaa \$1,000 iyagoo maraya Lacagaha Waxqabadka Kiraystaha. **Ma garanaysid sheeyada aad ku dalban karto?** Waakan shaxan kaa caawinaya in lagu hago.

Kharashyada Xaqa ah	Kharashyada aan Xaqa ahayn
Sheeyada aad lacagta ku isticmaali karto	Sheeyada aadan lacagta ku isticmaali karin
Aqoonsi qof mutadawac ah	Shaqsi wax-u-gaar in loo isticmaalo
Cunto ka-qeybgalayaasha iyo mutadawiciinta loogu talo-galay	Lacag sharaf-ahaan qof loo siiyo
Tababar	Aalkolo
Daabacaad	Howlo/dhacdooyin lacag lagu ururinayo, deeq lagu bixiyo arrimo saddaqa ah
Sheeyo iyo alaabo	Mashaariic/barnaamijyo joogto ah
Qalab isboorti*	Kharashyo lagu wadayo howlo ka baxsan xilliga lacagta loogu talo-galay
Qalab saxaafadeed*	Mushaarado iyo howlo dakhli soo-saaraya ee shaqaalaha, xubnaha kooxda iyo/ama dadk-ku-daysho-mudan
Qalabka-guriga iyo walaxaha-qurxinta(gudaha iyo dibadda)*	Tikidka bilaha ee TTC
Madadaalo iyo faakiheysi*	Safar dibadda ka ah Magaalada Toronto

Kharashyada xaqa ah iyo kuwa aan xaqa ahayn

Kiraystayaasha waxay heli doonaan fursad aay ku codsadaan kharashyo gaaraya ilaa \$1,000 iyagoo maraya Lacagaha Waxqabadka Kiraystaha. **Ma garanaysid sheeyada aad ku dalban karto?** Waakan shaxan kaa caawinaya in lagu hago.

Alaabta farshaxanka*	Howlo la xiriira ujeeddooyin diin iyo/ama siyaasadeed
----------------------	---

*Sheeyada la soo iibiyey waxaa lahaan doono Toronto Community Housing kiraystayaasha ayaana waxyaabo kale u isticmaali doona. Waxaa loo baahan yahay qorshe lagu keydinayo sheeyadan kiraystayaashana aay ku heli karaan.


Kharashyada xaqa ah iyo kuwa aan xaqa ahayn

Kiraystayaasha waxay heli doonaan fursad aay ku codsadaan kharashyo gaaraya ilaa \$1,000 iyagoo maraya Lacagaha Waxqabadka Kiraystaha. **Ma garanaysid sheeyada aad ku dalban karto?** Waakan shaxan kaa caawinaya in lagu hago.

Kharashyada Xaqa ah	Kharashyada aan xaqa ahayn
Sheeyada aad lacagta ku isticmaali karto	Sheeyada aadan lacagta ku isticmaali karin
Alaabta iyo walxaha-qurxinta jardiinooyinka*	Lacagta xubinimada
Tookanada Toronto Transit Commission (TTC), lacagta safarka celinteeda oo aay la socoto war tafatiran ee geeynta sheeyada /qalabka aagga dhacdada.	Shirarka
Ceymis mas'uuliyad haddii ceymis shirkadeed uusan jirin.	Khabiiro-lala-tashado
Ruqsadda dhacdada (haddii aay khuseyso)	
Dad khudbado/madadaalo dhiirigelin ah jeedinaya	

*Sheeyada la soo iibiyo waxaa iska leh Toronto Community Housing waxaana heli kari doona kiraystayaasha si aay wax kale ugu isticmaalaan. Waxaa loo baahan yahay qorshe lagu keydinayo sheeyadan oo aay kiraystayaasha ku heli karaan.

Foomka Codsiga Lacagaha Waxqabadka Kiraystaha



Foomka Codsiga Lacagaha Waxqabadka Kiraystaha

Application number (For Toronto
Community Housing use only):

Qeybta A: Xogta codsadhaha

Nooca codsiga

Kirayste

Koox kiraystayaal

Magaca codsadhaha (haddii koox kiraystayaal ah aay yihiin, tax dhamaan xubnaha):

Cinwaan:

Unugga Howlfulinta:

Email (haddii aay koox tahay, qor qofka lala xiriirayo email-kiisa):

Lambar taleefan (haddii aay koox tahay, qor qofka lala xiriirayo taleefankiisa):

Ma dooneysaa in lagugu daro liiskeena emailada ee Habka Howlfulinta
Kiraystaha?

Haa

May

Foomka Codsiga Lacagaha Waxqabadka Kiraystaha

Qeybta B : Taageerada beesha

Tax dhamaan kiraystayaasha kugula howlan dalabkaaga iyo cidda taageereyso codsigan. Ugu yaraan siddeed kirayste ayaa loo baahan yahay in aay taageeraan mashruucaaga.

#	Magaca Kiraystaha	Cinwaanka	Lambar taleefan ama email	Saxiixa
1				
2				
3				
4				
5				
6				
7				
8				

Lacagaha Waxqabadka Kiraystaha Foomka Codsiga

Application number (For Toronto
Community Housing use only):

Qeybta C : Xogta Mashruuca

Magaca mashruuca: _____

Taariikhda la-filayo in uu bilowdo: _____

Taariikhda la-filayo in uu dhamaado: _____

Tilmaan mashruuca iyo sababta aad u soo jeedineyso. Fadlan si-gaar ah ugu sheeg sanduuqa hoose ama ku soo lifaaq dokumentigaaga (ugu badnaan 250 eray).

Muhimaddee beesha degaanka ayuu mashruucaaga la xiriiraa? Sax dhamaan inta khuseysa.

Maalgelin raasumaal

Tababar shaqo

Isgaarsiin

Howlo beel dhisid Barnaamijyo

beel

Meel beeled

Lacagaha Waxqabadka Kiraystaha

Dayactir

La-dagaalanka cayayaanka

Amaanka iyo nabdgelyada

Maareynta khashinka iyo

dib-u-meerteynta

Wax

kale: _____

Foomka Codsiga Lacagaha Waxqabadka Kiraystaha

Dooro dadka aad sida ugu weyn u bartilmaameedsaneyo

- | | | | |
|--------------------------|---------------|--------------------------|------------------|
| <input type="checkbox"/> | Caruurta | <input type="checkbox"/> | Waayeel |
| <input type="checkbox"/> | Dhalinta | <input type="checkbox"/> | Qoysas |
| <input type="checkbox"/> | Dadka waaweyn | <input type="checkbox"/> | Beel |
| | | <input type="checkbox"/> | Wax kaler: _____ |
| | | <input type="checkbox"/> | |

Imisa kiraysta ayaad fileysaa in aay ka qeybgalaan?

- | | | | |
|--------------------------|----------|--------------------------|-------------|
| <input type="checkbox"/> | ka yar 5 | <input type="checkbox"/> | 10 ilaa 20 |
| <input type="checkbox"/> | 5 ilaa 9 | <input type="checkbox"/> | Ka badan 20 |

Lamaanayaasha taageeraya mashruuca waa kuwee doorkooduna muxuu yahay? (haddii aay khuseyso)

Lamaanaha	Doorka (Tus. deeqo aan lacag ahayn, buugaag, alaabta dugsiyada, deeq lacageed, shaqaale)

Foomka Codsiga Lacagaha Waxqabadka Kiraystaha

Foomka Codsiga Lacagaha Waxqabadka Kiraystaha

Maxaad rajeyneysaa mashruucan in uu qabto? Waa maxay natiijooyinka ama faa'iidooyinka laga filaayo? Yaa mashruucan ka faa'iidi doono? Sidee ayuu mashruucan faa'iido ugu yeelan doonaa beesha? Maxaad rajeyneysaa in uu taro dadka?

Sax dhamaan inta khuseysa.

- Kiraystayaasha in uu ku xiro adeegyada iyo fursadaha.
- In uu sameeyo lamaanenimo iyo shabakad si dadka loo gaarsiiyo barnaamijyo iyo adeegyo degaanka ah oo hagaajin doona xaaladaha bulsho horumarina doona beelo ka amaan roon.
- Inuu kordhiyo ka-qeybgalka kiraystaha ee howlaha saameynta ku leh tayada nolosha kiraystaha.

Fadlan war tafatarin oo dheeraad ah ku bixi sanduuqa hoose ama ku lifaaf dokumentigaaga (ugu badnaan 50 eray).

Foomka Codsiga Lacagaha Waxqabadka Kiraystaha

Sideed ku qiimeyn doontaa guusha mashruuca? Sideed ku ogaan doontaa in mashruuca uu ahaa mid guuleystay?

Sax dhamaan inta khuseysa.

- | | | | |
|--------------------------|---|--------------------------|--|
| <input type="checkbox"/> | Xog-ururin fikradeed | <input type="checkbox"/> | Kooxo diiradda-wax-saara |
| <input type="checkbox"/> | Wareysiyo kiraystaha ah(fiidyow ama qoraal) | <input type="checkbox"/> | warqadaha la-saxiixo/ diiwaanka imaanshaha |

Fadlan wax tafatarin oo dheeraad ah ku bixi sanduuqa hoose ama ku lifaaf dokumentigaaga (ugu badnaan 250 eray).

Foomka Codsiga Lacagaha Waxqabadka Kiraystaha

Qeybta D: Kheyraad-dhaqaalaha

Kheyraad-dhaqaale maxay ah ayaad u baahan tahay mashruucaaga? Fadlan war tafatiran hoos ku bixi ama ku soo lifaaf dukumentigaaga.

Howsha	Kheyraadk-dhaqaalaha loo baahan yahay Sheeyo ama adeegyo maxay ah ayaad u baahan tahay iyo imisa? (haddii aay khuseyso)	Sideed door-bideysaa in aad ku hesho kheyraadka-dhaqaalaha? 1. Si toos ah TCHC (TCHC in aay ku siiso ama ku soo gaarsiiso sheeyo ama adeegyo aay soo iibisay) 2. In-laguu-celiyo (adiga in aad sii bixiso oo TCHC aay kuu celiso kharashyadaada) 3. Lacag-caddaan ah in laguu hormariyo*	Cadadka lacodsaday

Foomka Codsiga Lacagaha Waxqabadka Kiraystaha

Wadarta cadadka la-codsaday	\$
-----------------------------	----

* Lacagta-caddaanka ah ee lagu hormarinayo waxay ku xaddidan tahay \$500 waxayna ku xiran tahay ogolaashaha TCHC.

Foomka Codsiga Lacagaha Waxqabadka Kiraystaha

Qeybta E: Cadeyn

Sax sanduuq walba si aad u qirto in aad tixgelin siisay.

- Dhaqaalaha waxaa loo codsan karaa in loo isticmaalo kharashyada xaqa u leh ee ku taxan iyo ujeedo mashruuca ah oo kaliya. Dhaqaalaha looma isticmaali kari doono wax-shaqsi ah.
- Lacagaha oo dhan xisaab-xir baa lagu soo sameyn doonaa iyadoo lala soo gudbin doono reciityo sheey-sheey ah foomka warbixinta kharashyada oo la soo buuxiyey iyo wixii lacag ah ee aan la isticmaalin 14 maalmood gudahood mashruuca markuu dhamaado.

Dhamaan codsabayaasha guuleysta waxay soo gudbin doonaan warbixin kooban marka mashruuca uu dhamaado. Warbixinta kooban waxaa ku jira waxyaabaha lagu guuleystay iyo mashruuca wixii lagala kulmay caqabado, imisa kirayste ayaa ka qeybgashay mashruuca iyo/ama markhaati-furka kiraystayaasha. Wixii sawiro ama fiidyow ah ee la bixiyo waa in ogolaasho laga hayo kirayastaha. Tusmo mashruuca ah ayaa lagu siin doonaa.

- Dhamaan codsabayaasha lacag la siiyo waa in aay soo xiraan xisaabta ka hor inta aaysan raadsan dhaqaale dheeraad ah.

Codsabayaasha lacag la siiyey ma heli doonaan dhaqaale dheeraad ah haddii aay ku takrifalaan ama aaysan soo xirin xisaabta.

- Dhamaan go'aanada aay gaaraan Miiska Lacag-bixinta Ku-meelgaarka waa kama-dambeys. Haddii qofka uu soo codsado fikrad ku saabsan codsiyada la diiday ayaa la siin doonaa.
- Kiraystayaasha waa loo ogol yahay in aay dib-u-soo-gudbiyaan codsiyada la diiday.
- Dhamaan qeybaha A ilaa E ee foomka codsiga waa la buuxiyey.

Foomka Codsiga Lacagaha Waxqabadka Kiraystaha

Saxiixa codsadaha (haddii aay koox tahay, isticmaal qofka lala

xiriirayo saxiixiisa/saxiixeeda):

Magaca codsadaha (haddii aay koox tahay, qor qofka lala xiriirayo

magaciisa/magaceeda): _____

Taariikhda: _____

Macluumaadka shaqsiga ah ee lagu codsaday foomkan waxaa lagu ururinayaa si waafaqsan awoodda s. 28(2) *Xeerka Dowladda-hoose ee Xoriyadda Macluumaadka iyo Difaaca Xogta-shaqsiga ah*. Macluumaadka waxaa loo isticmaali doonaa habraaca Habka Howlgelinta Kiraystaha ee La-cusbooneysiiyey iyo ujeedooyin maamul guud ah. Haddii aad leedahay wax su'aal ah oo ku saabsan ururinta macluumaadkan, fadlan kala xiriir Qof-ku-takhasusay Macmluumaadyada, 931 Yonge Street, Toronto ON, M4W 2H2, **416-981-5500**.

Foomka Codsiga Lacagaha Waxqabadka Kiraystaha

Qeybta F: Ansixinta guddiga

Taariikhda shirka: _____

Dhibcaha codsiga: _____

Go'aanka kama-dambeysta ah: _____

Magaca xubinta guddiga	Saxiixa	Taariikhda

Qeybta G: Ansixinta Toronto Community Housing

Magaca shaqaalaha	Doorka	Saxiixa	Taariikhda
	Isku-duwaha Adeegyada Beesha		
	Maareeye, Howlgelinta Kiraystaha iyo Horumarinta Beesha		
Wadarta cadadka la ansixiyey	\$		
Koodka Miisaaniyadda			

Nala soo xiriir



torontohousing.ca/TER



taf@torontohousing.ca



@TOhousing



@torontohousing



YourcommunityYoursay



416-981-4435



@TorontoCommunityHousing



@TorontoCommunityHousing



Si aad ugu codsato dokumentigan hab aad heli karto ama mid la turjumay,

fadlan la xiriir help@torontohousing.ca ama wac **416-981-5500**.

Copyright © 2019 Toronto Community Housing